



Iska jooji isticmaalka waxyaabaha maqaarka lagu caddeeyo ee merkurida leh

Baadhitaano dhowaan ah ayaa muujinaya in waxyaabaha qaarkood ee maqaarka lagu caddeeyo (waliba loo yaqaan midab-khafiifinta, dhalaalinta ama dhalan-rogga maqaarka) inay leeyihiin heerar sare oo merkuri ah. Ku bixitaanka merkurida ku jira waxyaabahan ayaa keeni kara dhibaatooyin caafimaad oo halis ah.

Ubadka aan wali dhalan, kuwa sabiga ah iyo carruurta ayaa dareen badan ku leh merkuriga. Haweenka uurka leh iyo haweenka da'da ilmo-qaadka ah ayaa ah inay ka fogaadaan inuu ku baxo merkuridu.

Maxaa kula gudboon inaad sameyso?

U fiirso qoraalka farriinta ku dul yaal sheyga maqaarkaaga caddeeynaya. Haddi sheygu u merkuri leeyahay (oo waliba loo yaqaan "calomel," "mercuric," "mercurous," ama "mercurio") AMA haddii UUNA qoraalku tilmaamayn waxyaabaha ku jira sheyga isticmaalka:

1. Jooji isticmaalka sheyga hadda. Haddii aad isticmaaleysay shey leh merkuri, oogadaada ayaa si dabiici ah iskaga saari doona merkurida muddo ka danbow.
2. Ha ku tuurin sheyga qashinka. Haddii ay leedahay merkuri, waxay waxyeello u geysan doontaa dadka kalehaddii ay gasho bey'ada.
3. U gee sheyga goobta la geeyo qashinka halista ah ee guriga. Waxaad ka heli kartaa buugga taleefanka ama degelka internetka ee Minnesota Pollution Control Agency bey'ada kuna taal www.pca.state.mn.us (raadi "household hazardous waste" oo ah qashinka halista ah ee guriga).
4. Haddii waxa su'aalo ah aad qabto, uga wac Poison Control Center, 1-800-222-1222. Waxay furan tahay 24ka saac maalintii, toddobada maalmood ee usbuuca, oo waxay bixisaa adeegyada tarjumaadda luqadda.

Si aad u aragto sheyda la ogaaday inay leeyihiin merkuri, booqo
www.health.state.mn.us/topics/skin.